# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

Golaha Wakiillada




# WARBIXINTA

## WAXQABADKA SANNADKII 2023

## EE GOLAHA WAKIILLADA 5AAD EE SOMALILAND

SOMALILAND HOUSE OF REPRESENTATIVES © 2023

*Near Sha'ab Area, In-front of The Presidential Place*

HARGEISA-SOMAL

***JAMHUURIYADDA SOMALILAND***
***GOLAHA WAKIILADDA***

*********************************************

# *WARBIXINTA WAXQABADKA SANNADKII 2023 EE GOLAHA WAKIILLADA 5AAD EE SOMALILAND*

***January 2024***

# *HORDHAC.*

Xeer-dejinta dalku waxay ka mid tahay Saddexda tiir ee Qaranku ku qotomo, sida ku cad Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland, kuwaas oo kala ah Xukuumada (Excutive), Garsoorka (Judiciary) iyo Xeer-dejinta (Legislation).

Golaha wakiilladu waa mid ka mida ah labada aqal ee Baarlamaanka Somaliland ka kooban yahay, kuwaas oo kala ah (Guurtida iyo Golaha Wakiillada) oo marka la isku darro loogu yeedho Xeer-dejin ama Baarlamaan. Golahan Wakiillada ee la soo doortay 31 May 2021 waa Golihii labaad ee ku yimaada qaab doorasho toos ah, waana Golihii 5aad (shanaad) kana horeeyeen afar gole, saddexda gole ee kale waxay ku yimaadeen hab-beeleed (xulasho). Afartaas Gole ee Golahan ka horeeyay waxay kala ahaayeen: -

- Golihii Wakiillada ee lagu soo doortay shirweynihii Burco **1991 - 1993** kana koobnaa **(111)** xubnood.
- Golihii Wakiillada ee lagu soo doortay Shir-weynihii Beelaha Boorama **1993-1997** kana koobnaa **(75)** xubnood.
- Golihii wakiillada ee lagu soo doortay Shir-weynihii Beelaha Hargeysa **1997-2005** kana koobnaa **(82)** xubnood.
- Golihii wakiilada ugu horeeyay shacabku si toos ah u soo doorto September 2005kii, **2005-2021** kana koobnaa **(82)** xubnood.

Golaha Wakiillada waajibaadkooda, tilmaamtooda Guud iyo Awoodoodu waa Xubno ka wakiil ah dadweynaha, waana qeybta 1aad ee Xeer-dejinta iyo ogolaanshaha iyo Illaalinta Siyaasada Guud ee dalka lagu hagayo iyo sidoo kale ansixinta heshiisyada dawliga ah ee ay ka mid yihiin kuwa siyaasadeed, dhaqaale iyo nabadgelyo ama kuwa keenaya culays maaliyadeed oo cusub oo aan ku soo aroorin miisaaniyadda, ama keenaya soo saarid ama wax-ka beddelid qaanuun iyo sidoo kale Ansixinta Wixii Maaliyad khuseeya oo ka mid yihiin ansixinta Miisaaniyada, Ogolaanshaha Cashuuraha, Assaasida Keydka Dhakhliga Somaliland, Daabacada Lacagta iyo habeynta nidaamyada dhaqaale iyo kuwa lacageed, Sida ku cad Qodobka 39aad, Qodobka 53aad, Qodobka 54aad iyo Qodobka 55aad ee Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland.

Qaab-dhismeed-ka guud ee uu Golaha Wakiiladu leeyahay waxa u dheer inuu leeyahay Guddiyo u kala xilsaaran hawlo iyo shaqooyin kala duwan, waxanay ka kooban yihiin 10 Guddi Sida ku cad Xeer-hoosaadka Golaha Xeer Lr. 01/2021. Goluhu wuxuu Sannadkii 2023kii yeeshay 3 kal-fadhi, kuwaas oo kala ahaa kal-fadhigii 5aad, 6aad iyo 7aad. Hadaba warbixintani waxaynu ku soo koobaynaa Wax-qabadkii Golaha ee sannadkii ina dhaafay ee 2023kii.

## DOORASHADII GUDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILLADA

**23 July 2023** waxa si rasmiya u furmay kal-fadhigii 6$^{aad}$ ee Golaha Wakiillada 5$^{aad}$ ee Somaliland, waxa fadhigii ugu horeeyay Goluhu ku doortay Gudoomiyaha Golaha Wakiillada **Md. Yaasiin Maxamuud Xiir (Faratoon**), loo lankna kursiga Gudoomiyaha ayay ku tartameen labada Xildhibaan ee kala ah **Md. Maxamed Khadar Daahir** iyo **Md. Yaasiin Maxamuud Xiir (Faratoon),** fadhigan oo ay ka soo xaadireen 82 Mudane.

Fadhigan oo Gudoomiye ku-xigeenka 1$^{aad}$ Md. Siciid Mire Faarax Gudoomiyanayay, waxa 46 cod helay Md. Yaasiin Maxamuud, halka Md. Maxamed Khadaahir uu ka helay 35 Cod, waxaana sidaas Gudoomiyaha Golaha Wakiillada 5aad ee Somaliland ku noqday **Md. Yaasiin Maxamuud Xiir (Faratoon).**




Wuxuu Gudoomiyaha cusub uu si rasmiy xilka u la wareegay **02 August** xaflad lagu qabtay Xarunta Golaha oo ay ka soo qayb-galeen M/weyne ku-xigeenka Xukuumada Md. C/raxmaan C/laahi Ismaciil Saylici, Gudoomiyaha Golaha Guurtida Md. Saleebaan Maxamuud Aadam, Wasiiro, Xildhibaano, Madaxda saddexda Xisbi Qaran, Maayarka Caasimada iyo Masuuliyiin kale.

## WAX-QABADKA KAL-FADHIYADII EE SANNADKA2023

***Wax-qabadka Kal-fadhidii Sannadka 2023***

| | | |
|---|---|---|
| 1. | Golaweynaha ee Kal-fadhigii 5aad | 23 Fadhi |
| 2. | Golaweynaha ee Kal-fadhigii 6aad | 19 Fadhi |
| 3. | Golaweynaha ee Kal-fadhigii 7aad | 15 Fadhi |
| 4. | Kulamadii Guddiyada Golaha Wakiilladu yeesheeyn | 67 Kulan |
| 5. | Isugaynta Fadhiyada iyo Kulamadii Gudiyada | 124 Fadhi/kulan |

### Warbixinadii Golewaynaha laga hor akhirayay

| Taariikhda | Nooca Warbixinta | Cidii akhridey |
|---|---|---|
| 12/02/2023 | Warbixinta Shir-gudoonka ee Kal-fadhigii 4aad | Mr. C/risaaq Siciid Ayaanle Xoghayaha Guud ee Golaha |
| 25/02/2023 | Warbixinta Gudidda Joogtada iyo Anshaxa ee Kal-fadhigii 5aad | Md. C/laahi Muuse Xubin Gudidda ah |
| 25/02/2023 | Warbixinta Gudidda Arrimaha Gudaha ee Kal-fadhigii 5aad | Md. Axmed Yuusuf Nuur Guruuje Gudoomiyaha Gudidda. |
| 14/03/2023 | Warbixinta Gudidda Deegaanka iyo Khayraadka Dabiiciga ah ee Kal-fadhigii 5aad | Md. Mubaarik Muuse Ismaaciil Gudoomiyaha Gudidda. |
| 20/03/2023 | Warbixinta Gudiddii loo saaray Xog ururinta iyo u kuurgalida Xaalada Laascaanood | Md. Axmed Cabdi Ibraahim |
| 14/05/2023 | Warbixinta Gudidda Dhaqaalaha ee Wax ka badelka Xeerka Maamulka Maaliyada | Md. C/rashiid C/laahi Muuse Gudoomiyaha Gudidda |
| 15/05/2023 | Warbixinta Gudidda Arrimaha Gudaha ee Xeerka Ciidanka Qaranka | Md. Axmed Yuusuf Nuur Guruuje Gudoomiyaha Gudidda. |
| 14/08/2023 | Soo jeedinta Mooshinka Curinta Xeerka Gudidda Imtixaanada Qaranka | Md. Maxamed Khadar Daahi |
| 02/09/2023 | Warbixinta Hanti-dhawraha Guud ee Qaranka ee Xisaab Xidhka Sannadkii 2022 | Mr. Axmed Yuusuf Daahir |
| 02/09/2023 | Soo Jeedintii Madaxweynaha ee ansixinta Go'aankii Guidda Khilaafaadka ee H/jeclo iyo Waafajinta Xeerka Doorashooyinka | Mr. C/risaaq Siciid Ayaanle Xoghayaha Guud |
| 04/09/2023 | Warbixinta Gudidda Arrimaha Gudaha ee Xeerka Ciidanka Qaranka | Md. Axmed Yuusuf Nuur Guruuje Gudoomiyaha Gudidda. |
| 17/09/2023 | Warbixinta Gudidda Arrimaha Gudaha ee Xeerka Ciidanka Dab-damiska | Md. Axmed Yuusuf Nuur Guruuje Gudoomiyaha Gudidda. |
| 30/09/2023 | Warbixinta Gudidda Gaarka ah ee Xeerarka Doorashooyinka, Xeer Lr. 91 iyo Xeer Lr. 14 | Md. C/naasir Yuusuf Qodax Gudoomiyaha Gudida Gaarka ah |
| 25/12/2023 | Warbixinta Gudidda Arrimaha Gudaha ee Xeerka Nidaamka Garsoorka Ciidamada | Md. Axmed Yuusuf Nuur Guruuje Gudoomiyaha Gudidda. |

## Xeerarka Goluhu Ansixiyay

| No | Mashruuc Sharciga la Ansixiyay | Taariikhda |
|---|---|---|
| 1. | Xeerka Qaxootiga iyo Maganga iyo Doonka | 12/01/2023 |
| 2. | Xeerka Macdanta Qaranka | 2703/2023 |
| 3. | Wax-ka-beddelka Xeerka Nidaamka Ururada Iyo Axsaabta Siyaasadda | 30/09/2023 |
| 4. | Wax-ka-beddelka iyo Kaabista Xeerka Guud ee Doorashiiyinka | 30/09/2023 |
| 5. | Xeerka Ciidanka Dab-damiska Qaranka | 24/12/2023 |
| 6. | Xeerka Ciidanka Qaranka | 24/12/2023 |

## Masuuliyiintii Qaran ee Xilalkooda Goluhu Ansixiyay

| N | Magaca Masuulka | Xilka | Taariikhda |
|---|---|---|---|
| 1. | Md. Aamina Cilmi Fariid | Wasiirka Wasaarada Maal-gashiga iyo Warshadaha Somaliland | 27/02/2023 |
| 2. | Md. C/raxman Jaamac Hayaan | Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka | 27/02/2023 |
| 3. | | Xubin Gudidda H. Shaqaa;aha | 27/02/2023 |
| 4. | Md. Guuleed Cabdi Xasan | Xubin Gudidda Qandaraasyada | 27/02/2023 |
| 5. | Md. Cabdi Cismaan Dhagaweyne | Wasiirka Wasaarada Maal-gashiga iyo Warshadaha Somaliland | 23/09/2023 |
| 6. | Md. Cabdiraxmaan Maxamed Cabdilaahi | Gud. k/Xigeenka Baanka Dhexe | 23/09/2023 |
| 7. | Md. Cali Cumar Maxamed (Cali-Xoor-xoor) | Wasiirka Wasaarada Shaqo-galinta Arrimaha Bulshada iyo Qoyska Jsl. | 30/09/2023 |
| 8. | Md. Maxamed Baaruud | Xubin Komishanka Xuquuqal Insaanka | 23/12/2023 |
| 9. | Maxamed Xasan Caalin | Xubin Komishanka Xuquuqal Insaanka | 23/12/2023 |
| 10. | Mustafe Cail Cismaan | Xubin Komishanka Xuquuqal Insaanka | 23/12/2023 |
| 11. | Maxamed Jaamac Ibraahim | Xubin Komishanka Xuquuqal Insaanka | 23/12/2023 |
| 12. | Baashe Maxamed Faarax | Xubin Komishanka Xuquuqal Insaanka | 23/12/2023 |
| 13. | Muuse Jaamac Cige | Xubin Komishanka Xuquuqal Insaanka | 23/12/2023 |

# Mashaariicda Sharci ee Golaha horyaal

### B. Mashaariicda ee Gudiyaddu gacanta ku hayaan

| No | Magaca Xeerka | Gudidda gacanta ku heysa |
|---|---|---|
| 1. | Mashruuc Sharciga Aasaaska Wakaalada Madbacada Qaranka | Gudidda Dhaqaalah, M. iyo Ganacsiga |
| 2. | Mashruuc Sharciga Jidaynta kabka H. Gobolada Barri iyo Nidaaminta Cashuuraha Dawladda dhexe u qabato dawldaha hoose | Gudidda Dhaqaalah, M. iyo Ganacsiga |
| 3. | Wax ka badelka iyo Kaabista Xeerka Duulista Hawada | Gudidda Hawlaha Guud |
| 4. | Mashruuc Sharciga Aasaaska Kaydka Haamaha Shidaalka | Gudidda Dhaqaalah, M. iyo Ganacsiga |
| 5. | Xeerka Amniga Technology-yada iyo Dambiyada Technology-yada Casriga ah | Gudidda Hawlaha Guud |
| 6. | Xeerka Illaalinta Xogta Electronics-ka ah | Gudidda Hawlaha Guud |
| 7. | Xeerka Hawl-gabka iyo Xaqsiinta Shaqaalaha Dawlada | Gudidda Arrimaha Bulshada |
| 8. | Wax ka badelka iyo Kaabista Xeerka Wada-marita Gaadiidka | Gudidda Hawlaha Guud |
| 9. | Xeerka Xafiiska Imtixinaadka Qaranka | Gudidda Arrimaha Bulshada |
| 10. | Xeerka Laanta Socdaalka | Gudidda Arrimaha Gudaha |
| 11. | Xeerka Caasimada | Gudidda Arrimaha Gudaha |
| 12. | Wax ka badelka Xeerka Nidaamka Garsoorka | Gudidda Shuruucda, C. iyo X, Insaanka |
| 13. | Xisaab Xidhka Miisaaniyad sannadeedkii 2022gii | Gudidda Ilaalinta iyo D. H. Qaranka |

### T. Xeerarka Gole Waynaha Horyaal

| | | |
|---|---|---|
| 1. | Wax ka badelka Xeerka Maamulka Maaliyada | Golewaynaha |
| 2. | Xeerka Dakhliga Shidaalka | Golewaynaha |
| 3. | Xeerka Ciidamada Qaranka | Madaxweynaha ka soo noqday |
| 4. | Wax ka badelka Xeerka Dakhliga Guud | Madaxweynaha ka soo noqday |

### J. Xeerarka Guurtida ku maqan

| | | |
|---|---|---|
| 1. | Xeerka Nidaamka Garsoorka Ciidamada | Golaha Guurtida |

## GO'AAMADII GOLUHU GAADHAY

Sannadkii 2023kii Golaha Wakiilladu 3 Kal-fadhi oo uu yeeshay wuxuu ku gaadhay ama cod gacan taaga ku meel-mariyay 27 go'aan oo isugu jiray Ansixinta Xeerar, Masuuliyiin Qarn, Qaraaro Gole iyo Diidmo soo jeedimo Madaxweynuhu soo gudbiyay sida kalsooni kala noqoshadii Xubinta Komishanka Doorashooyinka iyo Xubin Wasiira oo markii hore Goluhu diiday.

Hadaba, 27 go'aan ee kala duwan waxay kala ahaayeen: -

| Mawduuca Go'aanka la Ansixiyay | Taariikh | U Gudbay |
|---|---|---|
| Go'aanka Ansixinta Xeerka Qaxootiga iyo Magangalyo doonka | 12-01-2023 | M/weynaha |
| Go'aanka Ansixinta Xeerka Macdanta | 27-03-2023 | M/weynaha |
| Go'aanka Ansixinta Wasiirka Maal-gashiga iyo Warshadaha | 27-02-2023 | M/weynaha |
| Go'aanka Ansixinta Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka | 27-02-2023 | M/weynaha |
| Go'aanka Ansixinta Xubin Gudidda H. Shaqaa;aha | 27-02-2023 | M/weynaha |
| Go'aanka Ansixinta Xubin Gudidda Qandaraasyada | 27-02-2023 | M/weynaha |
| Go'aanka Ansixinta Xeerka Shirkadaha Caymiska | 14-03-2023 | M/weynaha |
| Go'aanka Ansixinta Heshiiska Doorashooyinka ee Gudidda Dhexdhexaadinta Beesha H/Jeclo | 02/09/2023 | M/weynaha |
| Go'aanka Diidmada Kalsooni kala noqoshada Xubin Komishanka Doorashooyinka Qaranka | 23-09-2023 | M/weynaha |
| Go'aanka Ansixinta Ajandaha Kal-fadhiga 6aad ee Golaha Wakiillada. | 07/08/2023 | G/weynaha |
| Go'aanka Ansixinta Mooshinka Xafiiska Imtixaanaadka qaranka oo ku saabsan wax-ka-beddel Xeerka Wax-barashada Jsl. | 14/08/2023 | G/weynaha |
| Go'aanka Diidmada Wasiirka Wasaarada Shaqo-galinta, Arrimaha Bulshada iyo Qoyska Mr. Cali Cumar Maxamed (Cali-xoor-xoor) | 22/08/2023 | M/weynaha |
| Go'aanka Ansixinta Md. Cabdi Cismaan Dhagaweyne Wasiirka Wasaarada Maal-gashiga iyo Warshadaha Somaliland | 23/09/2023 | M/weynaha |
| Go'aanka Ansixinta Md. Cabdiraxmaan Maxamed Cabdilaahi Gudoomiye ku Xigeenka Baanka Somaliland. | 23/09/2023 | M/weynaha |
| Go'aanka Ansixinta kordhin Fadhi mudo 2-ba todobaad ah, kana bilaabmaysa 24 – 08- 2023 ilaa 07- 09- 2023-ka | 23/09/2023 | G/weynaha |
| Go'aanka Ansixinta Md. Cali Cumar Maxamed (Cali-Xoor-xoor) Wasiirka Wasaarada Shaqo-galinta Arrimaha Bulshada iyo Qoyska Jsl. | 30/09/2023 | M/weynaha |
| Go'aanka Ansixinta Qaraan Goluhu Ka soo saareen Soo-jeedinta Mudanayaasha Gobolka Awadal oo cod loo qaaday | 30/09/2023 | M/weynaha |
| Go'aanka Ansixinta Wax-ka-beddelka Xeerka Nidaamka Ururada Iyo Axsaabta Siyaasadda Xeer Lr. 14/2023. | 30/09/2023 | G/Guurtida |
| Go'aanka Ansixinta wax-ka-beddelka iyo Kaabista Xeerka Guud ee Doorashiiyinka iyo Cod-bixiyayaasha Xeer Lr. 91/2023. | 30/09/2023 | G/Guurtida |

| | | |
|---|---|---|
| Go'aan Gole | 30-09-2023 | M/weynaha |
| Go'aanka Ansixinta Md. Maxamed Baaruud Xubin Komishanka Xuquuqal Insaanka ah | 23/12/2023 | M/weynaha |
| Go'aanka Ansixinta Md. Maxamed Xasan Caalin Xubin Komishanka Xuquuqal Insaanka ah | 23/12/2023 | M/weynaha |
| Go'aanka Ansixinta Md. Mustafe Cail Cismaan Xubin Komishanka Xuquuqal Insaanka ah | 23/12/2023 | M/weynaha |
| Go'aanka Ansixinta Md. Maxamed Jaamac Ibraahim Xubin Komishanka Xuquuqal Insaanka ah | 23/12/2023 | M/weynaha |
| Go'aanka Ansixinta Md. Baashe Maxamed Faarax Xubin Komishanka Xuquuqal Insaanka ah | 23/12/2023 | M/weynaha |
| Go'aanka Ansixinta Md. Muuse Jaamac Cige Xubin Komishanka Xuquuqal Insaanka ah | 23/12/2023 | M/weynaha |
| Go'aanka Ansixinta Xeerka Ciidanka Qaranka | 23/12/2023 | G/Guurtida |
| Go'aanka Ansixinta Xeerka Ciidanka Qaranka | 24/12/2023 | G/Guurtida |
| Go'aan lagu ansixiyay Qoraar Gole oo ku saabsan Heshiiska Somaliland iyo Ethiopia. | 08/01/2024 | G/waynaha |
| Go'aanka Ansixinta Wax-ka-beddelka Xeerka Nidaamka Ururada Iyo Axsaabta Siyaasadda Xeer Lr. 14/2023. | 15/01/2024 | M/weynaha |
| Go'aanka Ansixinta wax-ka-beddelka iyo Kaabista Xeerka Guud ee Doorashiiyinka iyo Cod-bixiyayaasha Xeer Lr. 91/2023. | 15/01/2024 | M/weynaha |
| Go'aanka Ansixinta Xeerka Ciidanka Qaranka | 13/02/2024 | G/Guurtida |
| Go'aanka Ansixinta Odoroska Miisaaniyada Qaranka ee 2024ka | 03/03/2024 | M/weynaha |

# WAX-QABADKA GUDDIYADA GOLAHA

Gudiddayada Golaha Wakiiladu waxay ka kooban yihiin 10 Guddi oo kala ah.

1. Gudidda Joogtada iyo Anshaxa.
2. Gudidda Dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Maaliyada.
3. Gudidda Deegaanka, Kheyraadka Dabiiciga, wax soo saarka iyo Tamarta
4. Gudidda Arrimaha Bulshada
5. Gudidda Arrimaha Shareecada, Dhaqanka iyo Qoyska
6. Gudidda Dastuurka, Garsoorka Cadaalada iyo Xuquuqal Insaanka.
7. Gudidda Arrimaha Dibada, Iskaashida Caalamiga iyo Qorshaynta iyo Maal-gashiga
8. Gudidda Arrimaha Gudaha, Nabadgelyada iyo Difaaca
9. Gudidda Hawlaha Guud, Gaadiidka iyo Technologyada
10. Gudidda ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranka.

Gudiyada Golaha wakiiladdu iyagoo Gudanaya Waajibaadkooda uu Dastuurka iyo Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada siiyay, waxay qaybtaan shaqooyinka ugu mihiimsan golaha wakiilada, iyada oo gudi wal u qaabilsan shaqooyin gaar ah Golaha.

Sidaa darteed waxay Golaha uga soo war bixiyaan Ansixintooda Masuuliyiinta ay soo magacawdo Xukuumada markaa joogtaa iyo Hay'adaha Madaxa Banaan. Hadaba, iyadoo Gudi waliba Warbixineeda Golaha ka hor akhrin doonta waxaan halkan idinku soo gudbinaynaa wax qabadkoodii Gudiyada oo kooban.

## 1. Gudidda Joogtada iyo Anshaxa

Guddida joogtada iyo Ashaxu iyada oo Gudanaysa waajibaadkeeda Dastuuriga sida uu dhigaayo Qodobka 53[aad] iyo Awoodaha uu qeexayo Xeer hoosaadka Golaha Wakiilada Waxa ay Guddidu sannadkii 2023kii qabatay shaqooyin badan waxa ay kulamo la yeelatay Masuuliyiin kala duwan. Hadaba wax-qabadkii Gudidda oo kooban waxa uu ahaa sidan:-

- **21 October 2023** Gudidda Joogtada iyo Anshaxu Waxay Dooratay Gudoomiyaha Gudiddaas, waxayna Gudoomiye u doorteen Md. Faysal Yuusuf Jaamac.

**Kulamadii Gudiddu la Yeelatay Masuuliyiinta Qaran**

- **21/01/2023** waxay kulan la yeesheen Gudoomiyaha Hay'adda Shaqaalaha Dawalada
- **12/07/2023** waxay kulan la yeesheen Gudoomiyaha Komishanka Maamula Wanaaga.
- **13/07/2023** waxay kulan la yeesheen Gudoomiyaha Hay'adda Shaqaalaha Dawalada
- **18/07/2023** waxay kulan la yeesheen Wasiirka iyo W. Ku-xigeenka Wasaarad Horumarinta Maaliyada
- **01/11/2023** waxay kulan la yeesheen masuuliyiinta BAANKA DHEXE oo uu hogaaminayo Gudoomiyaha Baanka DHexe Md. Dr. Cali C.laahi Daahir.

## 2. Gudidda Deegaanka iyo Kh. Dabiiciga ah, Wax soo-sarka iyo Tamarta

Guddida Deegaanku iyagoo Gudanaya Waajibaadkooda Dastuuriga ah iyo Awoodaha uu qeexay Xeer hoosaadka Golaha Wakiilada, waxay Guddidu soo qabatay labadaas sanno shaqooyin muhiim ah, sida Mashaariic Sharci, lafa-gurista Ansixin Masuuliyiin cusub oo Xukuumadda ka tirsan oo dhammaan ay u gudbiyeen Gole-waynaha.

### Mashaariicda Sharci ee ay Guddidu u gudbisay Gole-waynaha

- **2023,** Waxay Gudiddu Golewaynaha u soo gudbisay Xeerka Macdanta Qaranka oo ay ka soo shaqaysay
- **08/01/2024,** Waxay Gudiddu Golewaynaha u soo gudbisay Xeerka Dakhliga Shidaalka oo ay ka soo shaqaysay

### Gudiddu waxay Safaro ugu baxday Gobolada dalka qaaarkood.

- Gobolka Tog-dheer 02 May 2023

### Kulan Hawleedadii Gudiddu qabatay

- **02/05/2023,** Waxay Gudiddu kulan hawleed (Legislative Hearing) u qabatay Xeerka Dakhliga Shidaalka oo ay gacanta ku haysay.

## 3. Gudidda Illaalinta iyo Daba-galka Hantida Qaranka

### Kulamadii ay Guddidu la yeelatay Masuuliyiinta Qaranka

- **28/03/2023 waxay Kulan la yeelatay** Gudoomiyaha Hay'adda Dhawrista Tayada
- **23/05/2023 waxay Kulan la yeelatay** Maareeyaha Aaga Cashuuraha ka caagan (Free Zone)
- **17/05/2023 waxay Kulan la yeelatay** Gudoomiyaha Xafiiska Imtixaanaadka Qaranka
- **26/06/2023 waxay Kulan la yeelatay Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Qaranka**
- **10/07/2023 waxay Kulan la yeelatay** Maareeyaha Hay'adda Dekadaha Somaliland
- **01/11/2023 waxay Kulan la yeelatay** Wasiirka Wasaarada Maaliyada Md. Sacad Cali Shire **02/04/2023** waxay Gudiddu kormeer ku soo sama

### Kormeeradii Gdidda

- ysay Waddada isku xidha Magaalooyinka Berbera iyo Hargeysa, iyadoo Gudidda ay weheliyeen Enjineerada wadaas dhisay.

### Masuuliyiintii Qaran ee ay Golewaynaha uga soo tala-bixisay.

- **25/02/2023,** waxay Golewaynaha uga soo tallo-bixisay **Md. Guuleed Cabdi Xasan** oo loo magacaabay Xubinta Gudidda Qandaraasyada Qaranka, Wuxuu Goluhu Ansixiyay 27/02/2023.

## 4. Guddida Arimaha Bulshada

Guddida Arrimaha Bulshadu iyaga oo Gudanaya Wajibaadkooda Waajibaadkooda Dastuuriga ah iyo Xeer Hoosaadka Golaha Wakiilada oo Qeexaya Awoodaha Guddiyada Golaha wakiilada, Waxay Guddidu Qabatay Hawlo Muhiim ah sida:-

**Kulamadii Guddidi la Yeelatay Masuuliyiinta Qaranka**

- **27/12/2023** Waxay Kulan la yeelatay Gudoomiyaha Hay'adda Shaqaalaha Dawlada

**Kulamada Lafagurka Xeerka Gudidda Imtixaanaadka Qaranka**

- **October 2023** Gudidda Arrimaha Bulshadu waxay kulamo gorfayn iyo naaqishid ah ka yeelata Xeerka Gudidda Imtixaanaadka Qaranka oo ay Gacanta ku hayso.

**Masuuliyiinta Qaran ee ay Gole Weynaha uga soo Talo-Bixisay**

- **20/09/2023** waxay ka soo talo-bixisay in Xilka loo ansixiyo **Md. Cali Cumar Maxamed (Cali-Xoor-xoor)** Wasiirka Wasaarada Shaqo-galinta Arrimaha Bulshada iyo Qoyska, iyadoo Goluhu Xilkaas u ansixiyay **30/09/2023**
- **25/02/2023** waxay ka soo talo-bixisay in Xilka loo ansixiyo **Xubin Gudidda Hay'adda Shaqaalaha Dawlada**, iyadoo Goluhu Xilkaas u ansixiyay **27/02/2023**

## 5. Gudidda Dastuurka, Garsoorka Cadaalada iyo Xuquuqal Insaanka

Guddida Garsoorka iyo Cadaaladu iyaga oo Gudanaaya waajibaadkooda Dastuuriga iyo Awoodaha uu u qeexay Xeer hoosaadka Golaha Wakiiladu, waxa ay labadii Sanno ee Golaha cusubi joogay qabatay shaqooyin muhiim, sida ka soo tala-bixinta mashaariic sharci oo ay Golewaynaha u soo gudbisay, kulamo dadweyne, kulamo kala duwan oo ayla yeelatay Mauuliyiin iyo Haayado kala duwan, siidayn Maxbuus ajaanib ah oo xuquuq madani ah loo haystay iyo tababaro Aqoon korodhsi oo ay ka qaybgahay. Hadaba wax-qabadkii Gudidda oo kooban wuxuu ahaa sidan: -

**Kulamadii Gudiddu la Yeelatay Masuuliyiinta Qaranka**

- **20/09/2023**, Gudiddu waxay kulan la yeelatay Madax Sare oo ka socotay Hay'adda Laan-qayrta Cas (ICRC)
- **04/10/2023,** Gudida Garsoosku waxay kulan la yeelatay Xubnaha Cusub ee Komishanka Xuquuqal Insaanka
- **14/12/2023,** Guddida Garsoorka iyo Cadaalada ee Golaha Wakiiladu waxay Kulan la yeelatay Masuuliyiin ka socday Safaarada Ingriiska ee Somaliland

**Kormeeradii Gudidda**

- **07-09 September 2023** Waxay Gudidda Garsoorka, Cadaalada iyo Xuquuqal Insaanku kormeer shaqo tagtay Gobolka Tog-dheer

### Masuuliyiinta Qaran ee ay Golewaynaha uga soo tallo-bixisay

- **21/12/2023,** waxay Gudiddu Golewaynaha uga soo tallo-bixisay Xubnaha Komishanka Xuquuqal Insaanka oo 7 Xubnood ka kooban, kuwaas oo Goluhu Ansixiyay 23/12/2023.
- **25/02/2023,** waxay Gudiddu Golewaynaha uga soo tallo-bixisay Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka Md. C/raxmaan Jaamac Hayaan, kaas oo Goluhu Ansixiyay 27/02/2023.

## 6. Gudidda Dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Maaliyada

Gudidda Dhaqaalaha, Maaliyadda iyo Ganacsigu iyadoo markasta ka duulaysa awooda iyo waajjibaadka ay u qaabilsan tahay Golewaynaha, waxay Sannadkii 2023kii Gudiddu qabatay shaqooyin muhiim sida kasoo tala-bixinta Miisaaniayda Qaranka, mashaariic sharci iyo Masuuliyiin qaran oo ay Golewaynaha u soo gudbisay, sidoo kale waxay kulamo kalan duwan la yeesheen Masuuliyiin qaran oo kala duwan. Hadaba wax-qabadkii Gudidda oo kooban wuxuu ahaa sidan:-

### Kulamadii Gudiddu la Yeelatay Masuuliyiinta Qaranka

- **25/03/2023,** waxay Kulan la yeelatay Macalimiin Maamul xumo ka cabanayay
- **25/05/2023,** waxay kulan la yeelatay Masuuliyiinta Xafiiska Hantidhawraha Guud.
- **05/06/2023,** Waxay Kulan la yeelatay Gudoomiyaha iyo Agaasimaha Bangiga Dhexe
- **26/09/2023,** Waxay Kulan la yeelatay Wasiirka Wasaarada Maaliyada

### Kormeeradii Gudidda

- **15-12-2023** Waxay Gudidda Dhaqaaluhu Kormeer shaqo ku tagtay Xarnunta Bangiga Dhexe ee Somaliland.

### Mashaariicda Sharci ee Gudiddu Golaha u soo gudbisay

- **14-05-2023** waxay Golewaynaha u soo gudbisay **wax ka badelka Xeerka Maamulka Maaliyada**

### Kulan hawleedadii Gudiddu qabatay

- **31 May 2023** Guddida dhaqaalaha, Maaliyadda iyo Ganacsigu waxay kulan howleed u qabatay Mashruuca sharci Wakaalada Haamaha Shidaalka.

- **01 June 2023** Guddida dhaqaalaha, Maaliyadda iyo Ganacsigu waxay kulan howleed u qabatay Mashruuca sharci kabka horumarinta Gobolada bariga iyo nidaamka dakhliga dawlada dhexe u qabato dawladaha hoose.

- **31 May 2023** Guddida dhaqaalaha, Maaliyadda iyo Ganacsigu waxay kulan howleed u qabatay Mashruuca sharci Aassaaska Kaydka Haamaha Shidaalka.

### Masuuliyiintii Qaran ee ay Golewaynaha uga soo tala-bixisay.

- **20/09/2023,** waxay Golewaynaha uga soo tallo-bixisay Gudoomiye ku-xigeenka Bangiga Dhexe **Md. Cabdiraxmaan Maxamed Cabdilaahi**

## 7. Guddida Arr. Dibadda, Iskaashiga Caalamiga ah, Qorshaynta iyo M/gashiga

Guddiga Siyaasadda Arrimaha Dibadda, Iskaashiga caalamiga ah, Qorshaynta Qaranka Iyo Maalgashiga iyaga oo Gudanaya waajibaadkooda Dastuuriga iyo Awoodaha uu siiyay Xeer-hoosaadka Golaha Wakiiladu, waxay labadii Sanno ee Goluhu joogay ay qabatay shaqooyin muhiim sida, kormeero ay ku samaysay Wasaarada ay shaqa wadaaga yihiin iyo kulamo kalan duwan oo ay la yeelatay qaar ka mid ah Masuuliyiinta qaran. Hadaba wax-qabadkii Gudidda oo kooban wuxuu ahaa sidan:-

### Kulamadii Gudiddu la Yeelatay Masuuliyiinta Qaranka

- **20/09/2023** Waxay Kulan la yeelatay Wasiirka Horumarinta Maalgashiga **Md. Cabdi Cismaan Dhagweyne**
- **20 November 2023** Waxay kulan la yeeshay laba xilldhibaan oo ka tirsan Baarlamaanka Sweden oo dalka booqasho ku jooga, Labadan Xildhibaan oo kala ahaa **MP Magnus Berntsson** oo ah Guddoomiyaha Guddiga Arrimaha Dibada Baarlamaanka Sweden iyo **MP john E. Weinerhall,** Sidoo kale waxa kulanka ku wehelinayay Mikeal Torstensson oo ah wakiil sharafeed midowga yurub u qaabilsan Somaliland iyo Xirsi wadaadyare oo ah muwaadin Somaliland u dhashay oo Sweden degen.

### Masuuliyiintii ee ay Golewaynaha uga soo tala-bixisay Ansixintooda.

- **20/09/2023,** waxay Golewaynaha uga soo tallo-bixisay Wasiirka Wasaarada Horumarinta Maalgashiga iyo Warshadaha **Md. Cabdi Cismaan Dhagweyne** iyadoo Goluhu XIlkaas u ansixiyay 23/09/2023,
- **25/02/2023,** waxay Golewaynaha uga soo tallo-bixisay Wasiirka Wasaarada Horumarinta Maalgashiga iyo Warshadaha **Marwo. Aamina Cilmi Fariid** iyadoo Goluhu XIlkaas u ansixiyay 27/02/2023,

### Hawlaha kale ee Gudiddu qabatay

- **11/01/2024** waxay Gudiddu Kulan ugu qabatay Xarunta Golaha Wakiillada Ardayda Jaamacada UNITY qaybteeda Siyaasada iyo Xidhiidhka Caalamiga ah, waxay Ardayda xog ka siinaysay sida Gudiddan Siyaasada Arrimaha Dibadu u shaqayso, Xidhiidhka ay la leedahay Wasaarada Arrimaha Dibada iyo guud ahaan Siyaasada iyo Xidhiidhka Caalamiga ah ee dalka.

- **24/01/2023** waxay Gudiddu Kulan ugu qabatay Xarunta Golaha Wakiillada Ardayda Jaamacada CSI ee barata Kuliyada Siyaasada iyo Xidhiidhka Caalamiga ah, waxay Ardayda xog ka siinaysay sida Gudiddan Siyaasada Arrimaha Dibadu u shaqayso,

Xidhiidhka ay la leedahay Wasaarada Arrimaha Dibada iyo guud ahaan Siyaasada iyo Xidhiidhka Caalamiga ah ee dalka.

## 8. Guddida Hawlaha Guud, Gaadiidka, Guryaynta iyo Tiknooliyada

Guddida Hawlaha Guud, Tiknoolajiyadda, Guryeynta & Dhulka iyaga oo Gudanaya waajibaadkooda Dastuuriga iyo Awoodaha uu siiyay Xeer-hoosaadka Golaha Wakiiladu. Hadaba, Sanadkii 2022ka wax-qabadkii Gudiddu waxay kala ahaayeen sidan:-

### Kulamadii Gudiddu la yeelatay Masuuliyiinta Qaran

- **14/02/2023** Maareeyaha Duulista iyo Madaarada Md. Sayid Cumar C/laahi
- **20/07/2023** Taliyaha Ciidanka Dab-demiska Md.

### Kormeeradii Gudidda

- **21/03/2023** waxay Gudiddu kormeer ku tagtay **Biriishyada laga dhisay Lafa-ruug iyo Daragodle** si ay ugu kuurgasho khasaaraha ka soo gaadhay roobab labadaas biriish waxyeelo gaadhsiiyay.

### Kulamadii Dadweyne (Hearings) ee Gudiddu qabatay

- **November 1, 2023**, Guddidu waxay kulan-dadweyne (legislative hearing) u qabteen daneeyayaasha laba xeer oo kala ahaa
  1) Amaanka iyo dambiyada technology_yada casiriga ah,
  2) Xeerka ilaalinta xogta electronics ah,

## 9. Gudidda Arrimaha Gudaha, Nabadgalyada iyo Difaaca

Guddida Arrimaha Gudaha iyo Difaaca iyaga oo Gudanaaya waajibaadkooda Dastuuriga iyo Awoodaha uu u qeexay Xeer hoosaadka Golaha Wakiiladu, wax-qabadkeedii Sannadkii 2022ka wuxuu sidan:-

### Kulamadii Dadweyne (Hearings) ee Gudiddu qabatay

- **22/09/2023** Waxay Gudidda Arrimaha Guduhu kulan dadweyne (Legislative hearing) u qabatay Xeerka Ciidanka Qaranka oo Gudiddaas gacanta ku haysay, isla markaana uu ka soo qayb-galay Taliyaha Ciidanka Dab-damisku.

- **22/09/2023** Waxay Gudidda Arrimaha Guduhu kulan dadweyne (Legislative hearing) u qabatay Xeerka Ciidanka Qaranka markii labaad waxaana sidoo kale kulankaas ka soo qayb-galay Taliyaha Ciidanka Dab-damisku.

- **10/08/2023** Waxay Gudidda Arrimaha Guduhu kulan dadweyne (Legislative hearing) u qabatay Xeerka Ciidanak Dab-damiska oo Gudiddaas gacanta ku haysay, isla markaana uu ka soo qayb-galay Taliyaha Ciidanka Dab-damisku.

## Xeerarkii ay Golaha Waynahah u soo gudbisay

- **04/09/2023** Waxay Golewaynaha u soo gudbisay Xeerka Ciidanka Qaranka oo Gudiddu ka soo shaqaysay.
- **17/09/2023** Waxay Golewaynaha u soo gudbisay Xeerka Ciidanka Dab-damiska oo Gudiddu ka soo shaqaysay.
- **25/12/2023** Waxay Golewaynaha u soo gudbisay Xeerka Nidaamka Garsoorka Ciidamada oo Gudiddu ka soo shaqaysay.

## Gudiyadii Gaarka ahaa ee Sannadkii 2023 Gudoomiyuhu magacaabay.

Intii lagu jiray Sannadkii 2023kii waxa Goluhu saaray laba Gudi gaar ahaaneed (Ad hoc committee) loo xilsaaray hawlo gaar ah, waxayna kala ahaayeen:-

1. Gudidda gaarka ah ee loo saaray soo naaqishida Aassaaska mashruuc sharciga Ciidanka Qaranka.
2. Gudidda gaarka ah ee loo xilsaaray isa soo waafajinta Xeerarka Doorashooyinka iyo go'aankii Gudidda Khilaafaadka Siyaasada dalku soo saaraan.

## Gudiddii Gaarka ahay ee Is-waafajinta Xeerarka Doorashooyinka iyo Go'aankii Gudidda Khilaafaadka soo saareen.

Gudidda oo Gudoomiyuhu magacaabay **04 September,** waxay kulamadoodii ugu horeeyay ku dooratay Gudoomiye iyo ku-xigeen, isla markaana ku dejisay qorshe-hawleedka iyo hab-raaca ay ku shaqayn doonto. Intaas ka dibn, Gudiddu waxay guda-gashay hwaleheedii shaqo waxayna 15 kulan oo kala duwan la yeelatay hay'addaha iyo qaybaha arrimaha bulshada si ay uga hesho tallooyin iyo xogo ay ku saleeyaan hawsha loo xilsaaray gaar ahaan Xeerarka Doorashooyinka khuseeya ee Xeer Lr. 91/2020 iyo Xeer Lr. 14/2011.




Gudidda oo ay waheliyaan labada Garyaqaan ee la shaqaynayay **Mr. Guulleed Dafac iyo Mr. Khadar** waxay guda-gashay labada Xeer doorasho ee Xeerka Doorashooyinka Guud iyo Cod-bixiyayaasha Xeer Lr. 91/2020 iyo Xeerka Ururada iyo Axsaabta Siyaasada Xeer

Lr. 14/2011.

Waxay Gudiddu xeerarkaas ku dabaqday waxyaabihii uga soo baxay kulamadii wada-tashi ee ay la yeelatay Hay'addaha Dawlada, xubnihii hore KDQ iyo Gudidda Diiwaangalinta Ururada iyo qaybaha kala duwan ee Ururada Arrimaha Bulshada. Waxayna ugu dambeyn Golaha ku soo celisay labadaas xeer oo warbixin dheer ka siisay shaqadii ay ka asoo qabteen **30 September 2023,** iyadoo Goluhu cod aqlabiyad ah 2/3 ah ku ansixiyay labadaas oo u gudbay Golaha Guurtida.

\

## BARNAAMIJYADA TABOBARADA & KOBCINTA AQOONTA EE XILDHIBAANNADA & CUDUDDA SHAQALAHA GOLAHA

**3 January 2024-ka,** waxa tababar laba maalmood ah loo qabtay Agaasimayaasha iyo Agaasime-xigeennada Golaha Wakiilada, kaas oo ku saabsanaa qaabka loo diyaariyo qorshe-hawleedka Waaxaha Maamulka. Tababarkan oo lagu qabtay qolka shirarka ee Golaha waxa fududeeyey hay'adda IRI, waxaana bixiyey Shirkadda HASI Consulting. Tababarkan ayaa waxa aad uga faa'iideystey mas'uulliyinta Waaxaha Golaha, maadaama oo uu ku soo beegmay xili ay taahan tahay diyaarinta qorshe-sanaddeedyada Waaxaha Golaha, si waafaqsan Qorshaha guud ee Golaha Wakiilada.



*Mas'uulliyiinta Waaxaha Golaha oo qaadanaya tababar la xidhiidha dejinta Qorshe-sanaddeedka*

**10 December 2023-ka,** kulan aqoon-isweydaarsi oo la xidhiidha qabyo-tirka **Buugga Hab-Adeegsiga Shaqada Iyo Awooddaha Guddiyada** ayaa Xoghayayaasha Guddiyada loogu qabtay hoolka shirarka ee Xarunta Golaha Wakiilada, kullankaas oo uu furray Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiiladu, **Garyaqaan. C/risaaq Siciid Ayaanle.** Habraaca Guddiyada ayaa loogu talogalay inay ka faa'iideystaan Xubnaha Guddiyada iyo Shaqaalaha ka hawl-gala xafiisyada Guddiyadu. Waxa uu ka dhigan yahay daabacaadii koowaad ee uu soo saaro Maamulka Xoghaynta Golaha Wakiiladdu si waafaqsan Xeer-hoosaadka Golaha. Buugga Hab-Adeegsiga Shaqada Iyo Awooddaha Guddiyada waxa uu qayb ka yahay aa'laddaha kala duwan ee Golaha, sida Hagayaasha, Hab-raacyada, Siyaasaddaha, Dastuurka iyo Xeerarka, kuwaas oo Goluhu u adeegsado xil-gudashadiisa.



*Xoghayayaasha Guddiyada oo loo soo bandhigay Qabyo-qorraalka Buugga Hab-Adeegsiga Shaqada Iyo Awooddaha Guddiyada, 10 Dec. 2023-ka.*

**18 October 2023,** Gudoomiye ku-xigeenka 1aad ee Golaha **Md. Siciid Mire Faarax** (Giire) ayaa furay kulan aqoon is-waydaarsi laba maalmood socday oo loo qabtay Mudanayaasha labada Gole ee Baaralmaanka iyo Shaqaalaha kaas oo lagu lafa-gurayay laba qodob oo kala ahaa:-

- Xidhiidhka ka dhexeeya waaxda fullinta iyo waaxda sharci-dejinta ee nidaamka dawladeed ee leh habka madaxtooyada (presidential system), iyada oo si qoto dheer loo dersay dalalka caalamku sida ay u shaqeeyaan iyo wadashaqaynta Dalkeena dastuurka Somaliland dhigayo.
- Hababka lagu xalliyo khilaafyada ka dhasha geedi-socodka sharci samaynta ee dalalka leh Baarlamaanka ka kooban labada aqal.

**23 August 2023-kii,** Xoghaymaha Guddiyada Golaha ayaa waxa tabbo-bar lagu siiyey hannaan-xafiiseedka shaqada Xoghaymaha; sida qaababka loo diyaariyo warbixinnada iyo mowduucyo kale oo ahmiyad u leh shaqada Xoghaymaha Guddiyada. Tababarkaas oo socday muddo saddex maalmood ah waxa Golaha ka caawiyey hay'adda caalamiga ah ee HAP.




*Xoghayayaasha Guddiyada oo qaadanaya tabbo-bar shaqadooda la xidhiidha, 23 August 2023*

**26 July 2023-kii,** waxa maamulka waaxaha Golaha (Agaasimayaasha waaxaha iyo ku xigeennadooda) loo qabtay aqoon-isweydaarsi laba maalmood ah, kaas oo lagu qabtay xarunta Golaha Wakiilada. Aqoon-isweydaarsigan ayaa lagu gorfeeyey arimo la xidhiidha dib-u-eegista, qabyo-tirka, diyaarinta iyo hirgellinta siyaasaddaha, hagayaasha iyo habraacyada Goluhu u adeegsado gudashada waajibaadkiisa shaqo.

Aqoon-isweydaarsigan oo ay furreen, islamarkaasna kelmeddo dardaaran ah ka jeediyeen Guddoomiyaha Golaha Wakiilada, ***Md. Yaasiin X Maxamuud Xiir Faratoon,*** **Guddoomiye ku xigeenka 1aad** ***Md. Siciid Mirre Faarax (Giirre)*** **iyo Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada** ***Md. C/risaaq Siciid Ayaanle***, waxa bixiyey khubaro ka socdey Shirkadda HASI Consulting iyo La-taliye ka tirsan Golaha, islamarkaasna waxa ka caawiyey Golaha Hay'adda Caalamiga ah ee magaceeda loo soo gaabiyo IRI (International Republican Institute).

**12 January 2023-kii,** Tababar socday muddo saddex maalmooda oo ku saabsan ayaa




*Furitaanka Aqoon-iweydaariga Dib-u-eegista Siyaasaddaha & Hagayaasha Golaha, 26 July 2023*

Xarunta Golaha Wakiillada loogu qabtay Agaasime Waaxeedada iyo ku-xigeenadooda, tababarkaas oo ay bixisay **HASI Consulting** waxa maalgaliyay Hay'adda IRI.

## Xildhibaanada oo dib ugu laabtay Goboladii laga soo doortay.

➢ ***Xildhibaanada laga soo doorto Gobolka Saaxil***

**January 31, 2023**, Xildhibaannada laga soo doortay Gobolka Saaxil ee Golaha Wakiillada Somaliland ayaa dib ugu laabtay Gobolkoodii, iyagoo Xildhibaanadaasi kulan xog wareysi ah la yeesheen qaybaha kala duwan ee bulshada Gobolka Saaxil ee soo dooratay, waxayna ugu kuurgaleen Xaalada Gobolka iyo baahiyaha ka jira, sidoo kale waxay dadweynuhu su'aalo furan ku wadyiiyeen Xildhibaanadii ay doorteen iyadoo Xildhibaanadu dhamaan su'aalahaas uga jawaabeen.





➢ ***Xildhibaanada laga soo doorto Gobolka Sanaag***

